



Baro Xuquuqdaada Kireystaha



Dadka guryaha kireeya bulshada ayey muhiim u yihiin. Dadka guryaha kireysta kalabar ayey ka badan yihiin dadka Minneapolis. Hoos ka eego faahfaahin kooban oo ah xuquuqda lagu difaaco dadka guryaha kireysta ee Minneapolis.

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan xuquuqda kireystaha, soo graac HOME LINE ama 311.

✓ **Soo-baarashada kireystaha**

Waxaa jira shuruudo ah macluumaad uu milkiilaha guriga u isticmaali karo si uu u oggolaado ama u diido codsiga kireystaha. Haddii uu milkiilaha guriga go'aansado in uu isticmaalo shuruudo ka adag sharciyada Magaalada, waa in uu si shakhsi ah loo eego codsiga oo waa in uu qofku soo gudbiyo macluumaadka dheeraadka ah ee codsiga. Haddii aad wax walaac ah ka qabto dambiyo aad horay u soo gashay, taariikhdaadii kireyste, ama sumcaddaada lacagbixinta, si fiican u eeg shuruudaha oo kala hadal milkiilaha guriga ka hor intaadan gudbin codsiga kireystaha.

✓ **Lacagta horumariska**

Lacagta horumariska ah kama badnaan karo kiro ah hal bil. Haddii milkiiluhu ku weydiyo kiro ka badan hal bil oo ah horumaris, lacagtaasi kama badnaan karto boqolkiiba 50 kirada bisha, oo waa in aad ku bixiso saddex bilood gudahood. Markaad guriga ka guurto, milkiiluhu waa in uu lacagtii horumariska ahayd kuugu soo celiyo 21 maalmood gudahood, iyadoo dulsaar la socdo. Haddii milkiiluhu kaa reebto qeyb ka mid ah lacagta horumariska ah, waa in aad ka hesho waraaq qoraal ah oo laguugu sharxayo sababta lacagta lagaaga reebtay.

✓ **Ka-saarista Guriga**

Haddii milkiiluhu guriga kaa saaro adigoo bixin waayey kirada, waa in aad ka hesho ogeysiis qoraal ah ugu yaraan 30 maalmood ka hor. Ogeysiiska waa in uu ku qoran yahay inta lagugu leeyahay iyo sida aad u bixin karto. Sidoo kale, kireysteyaasha dakhligoodu yar yahay ee Minneapolis waxay xaq u leeyihiin qareen ku caawinaya kiisaskooda.

✓ **Haddii la iibinayo dhismaha aad ku nooshahay**

Haddii aad weli heshiis ku jirto, milkiilaha cusub waxaa khasab ah in uu raaco shuruudaha heshiiskaas. Haddii aad ku nooshahay guri ah kuwa qiimaha jaban, milkiilaha gurigu waa in uu Magaalada iyo dadka ku nool guriga ogeysiyo iibinta ka hor inta uusan guriga iibin. Haddii milkiilaha guriga cusub uu beddelo shuruudaha soo-baarashada ama kirada guriga 60ka maalmood ee ugu horreeya, magaalada ayaadka heleysaa lacag ah dibudejin. Soo garaac 311 si aad caawimaad u hesho.



Baro Xuquuqdaada Kireystaha



✓ **Dibudhisidda iyo dayactirka**

Kireysteyaasha guryaha ee Minneapolis waxay xaq u leeyihiin guri ay ku helaan badqabid oo ay iyagu rabaan. La xiriir milkiilaha mar kasta oo aad u baahan tahay dayactir. Haddii milkiiluhu kuu soo jawaabi waayo, la soo xiriir HOME Line si aad uga hesho talo ama soo garaac 311 si aad uga soo cabato.

✓ **Aargoosi**

Waxaa sharci darro ah in uu milkiiluhu dadka ka aargoosto ka dib marka laga soo warbixiyo xadgudub ka jira guriga. Haddii aad u maleyneyso in lagaa aargoosanayo, soo garaac 311 si aad ula hadasho Kooxda Xiriirka Guriyeynta.

For reasonable accommodations or alternative formats please contact 311. People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. TTY users call 612-263-6850. Para asistencia, llame al 311. Rau kev pab 311. Haddii aad Caawimaad u baahantahay 311.